Qofka ma qaadan karaa labo tallaal oo kala duwan sida AstraZeneca kadibna Pfizer?

Haddii qofku uu qaato labo tallaal oo kala duwan sida Pfizer, AstraZeneca jirkiisu wuxuu sameysanayaa difaac sareeya. Dadka qaatay labada tallaal ee kala duwan lagama soo sheegin wax dhibaato khaas ah oo ka duwan kuwa qaatay labada isku nooca ah. Finland badanaa qofka waxaa la siiyaa labo tallaal oo isku shirkad ah.

Dumarka uurka leh, kuwa ilmaha nuujinaya tallaalka koronaha ma qaadan karaan?

Dumarka uurka leh way qaadan karaan tallaalka koronaha xili walba oo uurku uu marayo. Sidoo kale tallaalka koronaha waa la qaadan karaa xiligga naasnuujinta. Tallaalku dhibaato uma keenayo hooyada iyo ilmaha ay wado ama koroya. Marka uurku weynyahay caabuqa koronuhu khatar weyn ayuu u keeno karaa hooyada uurka leh marka loo eego kuwa uurka aan laheyn.

Haddii hargab ama xannuun kale uu qofku qabo ma qaadan karaa tallaalka koronaha?

Haddii hargab aad qabto ha imaanin goobta tallaalka koronaha. Tallaalka dib u dhigo oo waqti kale qaado.

Qofka koronuhu uu ku dhacay goorma ayuu qaadan karaa tallaalka koronaha?

Qofku markuu ka bogsoodo koronaha isla markaasna uu dhameysto waqtiga karantiilka, markaas kadib ayuu qofku qaadan karaa tallaalka koronaha. Mida kale qofka caabuqa koronuhu uu ku dhacay uma baahna inuu tallaalka ku degdego maadaama oo difaaca jirkiisu sameysanayo uu gaari karo 6 ilaa 12 bilood.

Tallaalka koronaha ma keeni karaa in qofka ay timuhu ka daataan ama in araggiisu yaraado?

Maya, tallaalka koronaha laga soo sheegin inuu sababi karo calaamado noocaaas ah sida timaha oo daata ama aragga qofka oo yaraada.

Haddii uu koronuhu isoo maray, isla markaasna aan qaatay tallaalka koowaad ma ka maarmi karaa kan labaad?

Macluumaadka hadda la hayo waxay muujinayaan in qofka koronuhu ku dhacay uu halka tallaal ka helayo difaac la mid ah kan dadka labada tallaal qaatay. Sidaas awgeed wuu ka maarmi karaa qaadashada tallaalka labaad. Dhinaca safarka qofka ayaa laga rabaa inuu hubiyo in caabuqa iyo hal tallaal ay ku filan yihiin meelaha uu u safrayo.

Ka digtoonow wararka beenta ah ee tallaalka koronaha.

www.suomisomaliaseura.fi

Maxaa ka run ah talaalka koronaha?

www.suomisomaliaseura.fi

Suomi-Somalia Seura
Finland-Somalia Association
Communication | Development | Culture

Punainen Risti

Tallaalka koronuhu dhalmo la'aan ma keeni karaa?

Maya: Marka la eego cilmibaarista la sameeyey ama macluumaadka la uruuriyey inta tallaalku socday, ma jiraan wax muujinaya in tallaalka koronuhu saameyn ku yeeshay dhalmada.

Haddii caabuqa koronuhu uu isoo maray, maxaan uga baahnahay tallaalka?

Qofka uu soo maray caabuqa koronuhu wuxuu helayaa difaac qiyaastii 6-12 bilood. Qofka caabuqu ku xumaaday difaaciisu wuu ka sii badan karaa intaas. Maadaama oo difaaca caabuqu uu sii daciifayo waqtigaas kadib, qofka caabuqu ku dhacay waa muhiim inuu qaato hal tallaal si difaaca jirku u kordho

Tallaalka koronuhu wuxuu sababi karaa xinjirowga dhiiga, maxaa arinkaas sabab u ah?

Tallaalka "AstraZeneca" ee caabuqa koronaha ayaa lala xiriirinayaa khatarta. Iyadoo ay xirmi karaan isla markaasna ay dhiig bax sameyn karaan xididadda dhiigu. Arintaas waxa ku socda baadhitaano kala duwan Finland iyo caalamkaba. Waxaa laga shakisanyahay in difaaca jirku iska hor imaanayo sababayana in dhiigu xinjiroobo. Tallaalada kale ee koronaha ee Finland laga qaadanayo lagama soo sheegin wax ciladan ku taxaluqa.

Waxaan maqlay in tallaalka koronaha aan la ogeyn inta uu difaaca jirka siin karo, arinkaas ma runbaa?

Qofka labada tallaal qaatay wuxuu siinayaa difaac ilaa 6 bilood. Noocyada kale ee fayruska koronaha sida "delta" tallaalka difaaciisu wuu hooseeyaa. Difaaca tallaalka laga helayo waxay ku xiran tahay waqtiga u dhexeeyey labada tallaal. Haddii waqtigu isu dhowaa difaacu wuxuu noqonayaa mid diciif ah, haddii waqtigu kala fogaa difaacu wuxuu noqonayaa mid xoogan. Waxaa kale oo difaaca saameynaya qofka caafimaadkiisa, da´diisa, hadduu dawooyin qaato iyo haddii kale.

Tallaalka koronaha maxaa sabab u ah in la yiraa hadana tallaal sadexaad hala qaato? arinkaas soo ma sababi karo in la yiraa kuwo kalena hala qaato?

Sababtu waxa weeye, dadka u nugul cudurada labada tallaal waxay siinayaan difaac ilaa 6 bil. THL ayaa usoo jeedisay in dadkaas la siiyo tallaal sadexaad. Sidoo kale waxay soo jeedisay in dadka ay isku dhowaayeen labadooda tallaal inay qaataan tallaal sadexaad.

Maxaa ka run ah in tallaalka koronaha uu ku jiro dufanka doofaarka?

Tallaalada koronaha ee Finland laga isticmaalayo kuma jiro wax ku taxaluqa dufanka doofaarka ama xoolaha. Tallaalkan sameyntiisa waxaa loo isticmaalay sancada mRNA iyo RNA iyo dufan lagu sameeyey shaybaar oo daawada qaadaya.

Maxaa ka jira tallaalka koronaha in la rabo in dadka caalamka lagu kala yareeyo?

Wararka noocaas ah waa warar aan sal iyo raad-toona laheyn oo been abuur ah ayna faafiyaan dadka waxaas aaminsan. Tallaalka koronuhu saameyn kuma lahan taranka dadka iyo in haweenku uur qaadaan ama ilma dhalaan.

Maxaa ka jira in tallaalka konohana in uu keeni karo xannuunyo kale duwan, sida madax-xannuun, wadno xannuun, lugo xannuun, daal?

Tallaalka koronuhu dadka qaar wuu sababi karaa inay isku arkaan falcelin kala duwan sida madax xannuun, murqo xannuun, qandho iyo daal. Dhammaan calaamadahan falcelinta ah waa kuwo waqti kooban ku eg. Tallaalka koronaha lama hayo cadeyn inuu sababayo wadne xannuun joogto ah.

Maxaa suurogaliyey in si dhakhso leh loo soosaaro tallaalka koronaha?

Tallaalka koronaha meelo badan oo caalamka ah ayey cilmibaaristiisu ka socotay. Cilmibaareyaashuna waxay wadaagayeen kolba horumarka ay sameeyaan. Sidoo kale hay'adaha caafimaadku waxay kolba qiimeyn ku hayeen wixii horumar ah ee la sameeyey. Arimahaas oo isu tagay ayaa sababey in tallaalka mudo kooban gudaheed lagu soosaaro.

Maxay ku kala duwan yihiin tallaalada koronaha ee AstraZeneca, Pfizer, Johnson & Johnson?

Tallaalada AstraZenecan iyo Johnson & Johnson waa tallaalada loo yaqaano (adenoviral vector vaccine) halka Pfizerin iyo Modernan tallaalkoodu salka ku hayo cilmiga mRNA. Labada hore fayrus la khafiifiyey oo khatar la'aan ah ayaa qofka lagu mudayaa si jirku u sameysto difaac. Halka labada dambe ay ku saleysan yihiin cilmiga mRNA, kaas oo aan loo isticmaalin fayrus nool.

Ma waxaa jira xiriir ka dhexeeya wadne-bararka iyo tallaaladda koronaha?

Si naadir ah tallaalka mRNA dadka qaatay qaar kamid ah ayaa laga helay caabuq dhinaca wadnaha khuseeya, khaas ahaan ragga dhalinyarada ah. Ciladan dadka laga helay waxay sheegeen inay isku arkeen labo asbuuc tallaalka kadib. Tallaalka labaad kadibna dad intii hore ka badan ayaa ciladaas sheegtay. Ciladan ma aheyn mid khatar weyn leh dadkii isku arkayna way ka bogsoodeen.

Tallaalka koronaha ma fayruskii ayaa qofka lagu mudayaa mise waa wax kale?

Tallaalada koronaha ee Finland laga bixinayo kuma jiraan fayrus nool ama qeybo ka mid ah. Tallaalada noocaas ah waddamada qaar waa laga bixiyaa sida Shiinaha iyo waddamo kale. Kuwa Finland laga bixinayo farsamo kale ayey ku saleysan yihiin.

Suomi-Somalia Seura
Finland-Somalia Association
Communication | Development | Culture

Ka digtoonow wararka beenta ah ee tallaalka koronaha.

Punainen Risti